

2.4

Ma u baahan tahay qalab gargaar oo khaasa oo dadka jira 16-21 sano?

Ma u baahan tahay qalabka caawimada socodka ama qalab kale?

Barnaamijka Qalabka iyo Gargaarka (**Aids and Equipment Program**) waxaa laga yaabaa inay kaa caawimaan helida gargaarka, qalabka iyo wax ka bedelida lagama maarmaanka ah ee guriga (sida meesha la qabsado). Marmarka qaarkood waa inaad qayb ka qaadataa kharajka baxaya. Qalabka waxaa loo baahan yahay inuu qoro dhakhtar; isaga ayaana la xiriiri kara Barnaamijka Qalabka iyo Gargaarka isagoo magacaaga ku hadlaya.

Si aad wax badan uga ogaato aadna u hesho foomka dalabka la xiriir Barnaamijka Gargaarka iyo Qalabka, waxayna ku yaaliin:

Austin Health – Banyule: 9496 4094

Royal Melbourne Hospital - Parkville: 8387 2251 - Hume, Moreland

Royal Children’s Hospital (ilaa 18 sano) 9345 5964

St Vincent’s Hospital, Darebin (Koonfur), Melbourne, Yarra: 9288 3858

The Northern Hospital: Nillumbik, Darebin (Waqooyi), Whittlesea: 8405 8594

Western Hospital Sunshine, Maribyrnong, Moonee Valley, Brimbank, Melton:, Hobsons Bay, Wyndham: 8345 1267

Ma jeclaan lahayd qalab tijaabo ah ka hor intaadan samayn go’aanka gadashada?

Yooralla Equipment Library oo ku yaalla xarunta Independent Living Centre, Brooklyn 9362 6111 (Isniinta ilaa Jimcaha)

Xarunta Qaybinta Qalabka ee Royal Children’s Hospital 9345 5325

Xarunta Victorian Continence Resource Centre waxaa laga yabaa inay hayso alaab aad awoodo inaad tijaabiso. 9816 8266

ComTEC Disability Communication and Technology Solutions oo ku taalla Independent Living Centre, Brooklyn 9362 6111
Ujro iyo kharaj ayaa laga yaaba in la iska qaado.

Qalabku baahidaada wax ka qaban mayo miyaa?

Haddii qalabka la isla ogol yahay aanu wax ka qabanayn baahidaada, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho qalab gaar laguugu sameeyey ama wax laga bedelay. Tabaruciin ayaa sidaas sameeya waxaadna bixinaysaa keliya qalabka iyo kharajka safarka. La xiriir **TADVIC tel 9853 8655**

Ma u baahan tahay macluumaadka qalabka celin-la’aanta saxarada?

Arag xaashida macluumaadka kitkan 4.8 ‘macluumaadka qalabka celin-la’aanta saxarada ee dadka iinta qaba’.

Xalalka kharaj ku bixinta:

- Waxaad la xiriiri kartaa kooxda Intake and Response ee Wasaarada Adeega Aadamiga tel: 1800 783 783 kalana hadal wixii ku saabsan wixii kharaj bixin ah oo aad helli karto.

Xalalka kale:

- Variety Club wuxuu siiyaa carruurta u qabta baahi gaara caawimada qalabka kana wac tel: 8698 3900.
- Lions ama Rotary Club waxaa laga yaabaa inay kaa caawimaan lacag raadinta.
- Equipment Recycling Network waxay leedahay qalab qiima jaban lagu ibinayo oo gacantii labaad ah. www.erni.asn.au 03 9879 5211

Ma u baahan tahay qalabka isgaarsiinta khaaska ah?

Telstra Disability Equipment Program

Macaamiisha Telstra – qalabka khaaska ah ayaa la helaa si loo xaqiijiyo helida dhamaan macluumaadka. Qalabka ama badeecada la kireeyo waxay la mustawa yihiin telefoonka la bixiyey waxaana ka mid ah Teletypewriters (TTY), modem-ka kumbuyuutarka, telefoonada gacanta lagu qaadi karo iyo qalabka taageera aalladaha la adeegsado sida kan kantaroola heerka codka bidhaamiyaha araga. Wac lacag la’aan 1800 068 424
TTY 1800 808 981.